



Minister

Ref: WQHQ/W/24/71/2024

Date: 17/02/2024

Ku: Dhammaan Hay'addaha ka Hawlgala Somaliland

WAREEGTO WASIIR

Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku waxa ay u mahadnaqaysaa dhammaan hay'addaha wadaniga ah iyo kuwa caalamiga ah ee ka hawlgala Somaliland doorka ay ku leeyihiin horumarka iyo gargaarka binu-adamtinimada wadanka. Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku, iyada oo ka duulaysa xoojinta xidhiidhka wadashaqayneed ee ka dhaxeeya hay'addaha, isla markaana maskaxda ku haysa muhiimadda ay leedahay in la yeesho xidhiidh joogto ah iyo go'aan qaadasho ku dhisan wadatashi, sidoo kalena tixgelinaysa shuruucda wadanka iyo kuwa caalamiga ah, isla markaana ixtiraamaysa madaxbanaanida shaqo ee dhammaan hay'addaha aanu wadashaqaynta leenahay, waxa aan halkan idinkula wadaagaynaa qodobada hoos ku xusan:

1. Barnaamijyada ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ahi waa inay la jaan-qaadaan qorshaha guud ee horumarineed ee dalka (national development plan). waa inay dhiiri-geliyaan, muujiyaan mashaariic wax-ku-ool ah oo la taaban karo, isla markaasna ay kala shaqeeyaan ururadda Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee waddaniga ah deegaannada ay ka hawlgalaan kuna badhi-taaraan xoojinta tayadooda aqooneed iyo wax-qabad si loo helo in barnaamijyadaasu sii socdaan siina waaraan oo isku-fillaansho laga gaadho. sida ku cad faqradda 2aad ee qodobka 35aad ee Xeer Lr. 43/2010.
2. Dhammaan hay'addaha fulinaya mashruuc horumarineed ama gargaarka degdega ah/bani-aadamtinimada waa in ay ka diiwaan gashan yihiin xafiiska Diiwaangelinta ee Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka, sida uu dhigaayo xeerka Ururrada Samafalka aan Dawliga ahayn (Xeer Lr. 43/2010), qodobaddiisa 13aad iyo 28aad, iyo qodobka 28aad ee Xeer-Nidaamiyaha Dhismaha Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Xukuumadda (Xeer-nidaamiye Lr 01/2018).
3. Dhammaan shirkadaha gaarka loo leeyahay ee fulinaya mashaariic horumarineed ama gargaarka degdega ah/bina-aadamtinimada waa inay shahaadada fulinta mashruuca (Permit) ay ka qaataan Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka sida uu dhigaayo Xeerka Ururrada Samafalka aan Dawliga ahayn ee Xeer Lr. 43/2010, iyo qodobka

17/2/2024

4. Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee caalamiga ah waa inay dhiiri-geliyaan maal-gelinta ururadda Waddaniga ah ee aan Dawliga ahayn (USDAW) kana fogaadaan inay kula tartamaan hawlaha ay qaban karaan ururaddaasi si loo xoojiyo tayeynta aqooneed iyo wax-qabad ee ururaddaas waddaniga ah, sida ku cad faqradda 1aad ee qodobka 35aad ee (Xeer Lr. 43/2010).

5. USDAC, waa inaanay mashaariic fuliye (project implementor) u noqon ururrada kale ee Samafalka Caalamiga ah iyo Hay'adaha Qaramadda Midoobay, sida ku cad faqradda 3aad ee qodobka 35aad ee (Xeer Lr. 43/2010).

6. Waxa ka reeban dhammaan loo shaqeeyayaasha, in jagooyinka shaqo ee bannaanaada ee ay buuxin karaan muwaadiniintu loo qaato ajaanib, sida uu dhigaayo qodobka 34aad, 35aad iyo 36aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah (Xeer Lr 31/2020).

Wixii talo iyo tusaale ee ku aadan sidii loo wanaajin lahaa wadashaqaynta hay'addaha dawladda iyo hay'addaha aan dawlaga ahayn, waxa aad la soo xidhiidhaan Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka Mudane Mustafe Cumar Faarax (Email: dg.mopnd@sldgov.org).

Wadashaqayn Wacan

Axmed Maxamed Diiriye (Toorno)
Wasiirka,
Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka



- OG:
- Wasaaradda Shaqogelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska
 - Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska
 - Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda
 - Rugta Ganacsiga
 - Xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland